

Xafiiska Maayirka

REF: 122 /2019

DATE: 22ND, MARCH, 2019

Ku: Wasiirka Arrimaha Gudaha Hargeisa, JSL
Og: Wasiirka Maaliyada Hargeisa, JSL
Og: Madaxwaynaha Jamhuuriyada Somaliland Hargeisa, JSL

Ujeedo: Tacriifada Barnaamijka Casriiyanta Adeega Caasimada

Guddida Fullinta Dawlada Hoose ee Hargeisa, markii ay arkeen, ahmiyada ay leedahay fullinta heshiiska dalwada hoose ee Hargeisa iyo Shirkada Geosol ee ku saabsan casriiyanta magaalada Hargeisa iyo adeegyada dawlada hoose bixiso.

Markii ay darseen, fullinta barnaamijkan *yo shirkada dalwada hoose kala shaqaynaysay barnaamijkan* ay soo dhamaystireen *diyaarinta barnaamijkan* kaasi oo dhamaanba la diyaariyay nidaamkii iyo habraacii casriga *ahaa ee loogu talo galay*.

Markii ay tixgeliyeen, barnaamijkan oo *uu madaxwaynaha Jamhuuriyada Somaliland ibo furay, isla markaasina mudo sanad ah laga shaqaynayay loo baahan yahay in dhaqan galiyo*. Markii ay xaqiisadeen, in fullint *heshiiskan* loo baahanyahay in nidaamka cusub tacriifadiisi la dhaqan galiyo si dadku uga faafdaystaan.


Hadaba Guddida fullinta dawlada hoose *iyage oo ka duulaya tacriifada heshiiskii golaha degaanku ansixiyay, isla markaasina dib u qlimeeyay culayska tacriifadaasi leedahay in mar kaliya la dhaqan galiyo, waxa ay go'aamiyeen in tacriifada hoos ku xusan*:

1. ADEEGYADA NIDAAMKA CUSUB IYO KHIDMADAH

I. Diiwaangelinta iyo Sharciiyanta Dhulka Cusub:

Dhamaanba dhulka aan sharoiga tahayn, waxa la dardargalin doonaa in la diiwaangeliyo isla markaasina sharo lagaasho loo sameeyo madaama oo murankii dhulku batay. Dhulkaasi oo *nidaamka sharciiyantilisu* tahay mid casriya oo suurto gelinaysa arrimaha soo socda:

- Mudada:** Sharciiyanta dhulka waxa ay qaadataa ugu yaraan muujiyo bilan, halka dadka qaarna ay ku caadato bilo. Hirgelinta nidaamka custod waxaa muujiyo bilan, suuro-gelin doonaa in mudo ka yar (7) cisho ay qaadan doonte.



- **GIS:** Muwaadinka dhulka leh, waxaa loogu diiwaangelin doonaa nidaam casriya oo aanu muran gali Karin cabirka dhulkiisu kaasi oo jihoyinka(coordinates) dhulkiisa online ku arki karo.
- **Nidaam Casri:** Waxa uu muwaadinku heli doonaa nidaam casriya oo u suuro gelinaya marka uu dhul diiwaangeshanayo in aan wakhti badan kaga bixin isla markaasina uu fariin heli doono, marka uu dalbado sharciga kolba halka uu marayo sharcigiisii iyo haddii isaga wax looga baahdaba. Sidoo kale qofka ku nool qurbuhu uu online kula socon karo.
- **Shahaado Mulkiyadeed:** Qofku waxa uu heli doonaa shahaado casriya oo dhowrsaan isla markaasina aan la copy garayn Karin, taasi oo uu wax ku damiinan karo, rahmi karo arna dayn ku qaadan karo.
- **Khidmada:** Qofka si uu adeeg hufan u helo, waxa laga qaadi doonaa khidmadaha hoos ku xusan:

▪ Khidmada GIS Soo eegista:	\$ 45
▪ Khidmada Adeega System-ka:	\$ 15
▪ <u>Daabacaada Shahaadada Lahaanshaha:</u>	<u>\$ 105</u>
Total:	\$1,65


II. Kala Wareejinta Lahaanshaha Hantida Ma Guurtada ah:

Dhamaan kala wareejinta hantida ma guurtada ahi , dhul ama dhisme ha ahaadee, waxa ay u kala qaybsamayaan saddex nooc

1. Hanti GIS-ka nidaamka cusub lagu diiwaangeliyay oo la kala iibsanyo
2. Hanti hore loo kala iibsaday oo qofku system ka hore iibsaday laakiin aan wali lakala wareejin, iyo
3. Hanti GIS-kan aan ka diiwaangashanayn balse mustaqbal ka kala iibsan karo

- 1) Hanti GIS-ka nidaamka cusub lagu diiwaangeliyay oo la kala iibsanyo
- **Mudada:** Kala wareejinta hantida GIS-ka ka diiwaangashani waxa ay qaadan doontaa Maalin ama Laba (1 ilaa 2 cisho)
- **Nootaayo:** Marka la kala iibsanayo, nootaayadu waxa ay yeelan doontaa Port, halkaasi oo uu awood u leeyahay in uu ka hubiyo hantida uu kala iibinayaa in ay rahmantahay, cashuur lagu leeyahay ama maxkamadi xayirtay. Marka Nootaayadu hubiso, waxa ay iibkaasi toos u galinaysaa systemka.
- **Nidaam Casri ah:** Marka labada dhinac nootaayada ka soo dhamaadaan, waxa ay bixinayaan cashuurka kala wareejinta.
- **Shahaado Mulkiyadeed:** Qofka iibsadaha ahi waxa uu xaraynayaa shahaadadii hore, waxaana loo daabacayaa shahaado mulkiyad, sidoo kale waxa waxa Meesha laga saarayaa shahaadadii hore.
- **Khidmada:** Qofku si uu adeeg hufan u helo, waxa laga qaadi doonaa khidmadaha hoos ku xusan:

▪ Khidmada GIS Soo eegista:	\$ 45
▪ Khidmada Adeega System-ka:	\$ 15
▪ <u>Daabacaada Shahaadada Lahaanshaha:</u>	<u>\$ 105</u>
Total:	\$120



[Signature]

2. Hanti hore loo kala iibsaday oo qofku nidaamkan(system) casriga ah ka hor iibsaday laakiin aan wali lakala wareejin:
 - o Hantida hore loo kala iibsaday laakiin nidaamkan casriga ah aan lagu diwaan galin, qofka iibsadaha ayaa dib u diiwaangashanaya, iyada oo cashuurta kala wareejintu ku waajibtay.
 - o Nidaamka uu marayo diiwaangelinta cusub uun buu marayaa.
3. Hanti GIS-kan aan ka diiwaangashanayn balse mustaqbalka la kala iibsan karo
 - o Nootaayooyinku ma kala iibin karaan hanti aan GIS-ka ka diiwaangashanayn.
 - o Qofka iibsada hanti aan GIS-ka ka diiwaangashanayn waxa uu kala kulmi doonaa ganaax iyo masuuliyadihii dhulkaasi lagu lahaa oo dhan.

III. Diiwaangelinta iyo Mulkiyad u Samaynta Guriyihii Qadiimiga ahaa:


Dhamaan Guryaha qadiimiga waxa lagu diiwaangelin doonaa nidaam la mid ah ka lagu diiwaangelinayo dhulka cusub:

- a. **Mudada:** Sharciyaynta dhulka **waxa** ay qaadataa ugu yaraan mudo bil ah, halka dadka qaarna ay ku qaadato dhawr bilood. Hirgelinta nidaamka cusub waxa uu suuro-gelin doonaa in mudo ka yar (7) cisho ay qaadan doonto.
- b. **GIS:** Muwaadinka dhulka leh, **waxaa** loogu diiwaangelin doonaa nidaam casriya oo aanu muran gali Karin cabirka dhulkiisu kaasi oo jihoyinka (coordinates) dhulkiisa online **ku arki** karo.
- c. **Nidaam Casri:** Waxa uu muwaadinku heli doonaa nidaam casriya oo u suuro gelinaya marka uu dhul diiwaangeshanayo in aan wakhti badan kaga bixin isla markaasina uu fariin **hel** doono, marka uu dalbado sharciga kolba halka uu marayo sharcigisii iyo haddii isaga wax looga baahdaba. Sido kale qofka ku nool qurbuhu uu **online** kula socon karo.
- d. **Shahaado Mulkiyadeed:** Qofku waxa uu heli doonaa shahaado casriya oo dhowrsaan isla markaasina aan la copy garayn Karin, taasi oo uu wax ku damiinan karo, rahmi karo ama dayn ku qaadan karo.
- e. **Khidmada:** Qofka si uu adeeg hufan u helo, waxa laga qaadi doonaa khidmadaha hoos ku xusan:
 - i. Khidmada GIS Soo eegista: \$ 15
 - ii. Khidmada Adeega System-ka: \$ 10
 - iii. Daabacaada Shahaadada Lahaanshaha: \$ 105

Total: \$130

IV. Cashuurta Liisamada iyo ardiyadda.

A. Diiwaangelinta Liisamada Ganacsiyada



- a. **Mudada:** Mudada liisan ganacsi cusub ama kuwii jiray lagu diiwaangelinayo waxa ay noqon doontaa 2 laba cisho oo soo eegistu ku jirto.
- b. **GIS:** Ganacsi walba waxa lagu diiwaan gelinayaas GISka – Haddii ganacsiga dhismaha uu ku jiraa ka diiwaan geshanyahay GISka, kaasi uun baa lagu diiwaan gelinayaas.
- c. **Nidaam Casri:** Ganacsi walbaaba, waxa uu heli doonaa address, waxaana laga diiwaan gelin doonaa GISka.
- d. **Shahaado Mulkiyadeed:** Liisanka Ganacsi oo darajo walbaaba leedahay midab gaar ah,
- e. **Khidmada:** Qofka si uu adeeg hufan u helo, waxa laga qaadi doonaa khidmadaha hoos ku xusan: Darajada 1aad 2aad 3aad 4aad 5aad 6aad 7aad

i. Khidmada GIS Soo eegista:	\$ 20	\$15	\$12	\$10	\$8	\$5	\$4
ii. Khidmada Adeega System-ka:	\$ 10	\$10	\$10	\$10	\$5	\$	\$
iii. Daabacaada Shahaadada Lahaanshaha:	\$ 30	\$15	\$12	\$10	\$8	\$5	\$4
<u>Total:</u>	<u>\$ 60</u>	<u>\$40</u>	<u>\$34</u>	<u>\$30</u>	<u>\$21</u>	<u>\$10</u>	<u>\$8</u>

B. Cusboonaysiinta Liisamada

- a. **Mudada:** Mudada liisan ganacsi cusub ama kuwii jiray lagu diiwaangelinayo waxa ay noqon doontaa 1 Maalin oo soo eegistu ku jirto.
- b. **Nidaam Casri:** Ganacsi walbaaba, waxa uu heli doonaa address, waxaana laga diiwaan gelin doonaa GISka.
- c. **Shahaado Mulkiyadeed:** Liisanka Ganacsi oo darajo walbaaba leeyahay colour gaar ah,
- d. **Khidmada:** Qofka si uu adeeg hufan u helo, waxa laga qaadi doonaa khidmadaha hoos ku xusan: Darajada 1aad 2aad 3aad 4aad 5aad 6aad 7aad

iv. Khidmada Adeega System-ka:	\$ 10	\$10	\$10	\$10	\$5	\$	\$
v. Daabacaada Shahaadada Lahaanshaha:	\$ 30	\$15	\$12	\$10	\$8	\$5	\$4
<u>Total:</u>	<u>\$ 30</u>	<u>\$24</u>	<u>\$12</u>	<u>\$20</u>	<u>\$13</u>	<u>\$5</u>	<u>\$4</u>

Allah Mahad Leh

(AXMED YOONIS ADEN)
XOGHAYAHA FULLINTA DAWLADA HOOSE



(C/RAXMAAN MAA MUUD QAYDIID)
DUQA CAASIMADDA HARGEYSA,

AHNA GUDD/GOLASH DEEGAAR KAFEL CAASIMADDA HARGEYSA

